

# CAADOOYINKA CUNTADA EE CAAFIMAAD LEH IYO JIMICSI

Koley waxaad ka fikirtey waxa cuntada wanaagsan iyo jimicsiga ah ee ilmahaaga u fricani ay yihiin, waxaana laga yaabaa inaad marmarka qaar dareento inaanad hubin waxa saxda. Waa wax fiican in qaab habeysan loo dejiyo waxqabadka maalintaada kuwaas oo aad ilaalin karto oo aad lahaan doonto habab waxqabad oo qeexan; Taasi waxay adiga waalid ahaan iyo ilmahaba idiin sahashaa arrimaha. Waxay sahashaa in la yeesho isu dheelitir wanaagsan oo u dhexeeya cuntada, jimicsiga iyo hurdada, taas oo ah aasaaska koritaanka habboon ee caafimaadka ilmaha.

*U fiirso calaamadaha ilmahaaga – daal, gaajo, xanaaq, farxad, baahida loo qabo inuu adiga kugu soo dhowaado – iyo siyaabaha kala duwan ee aad ula dhaqmeysyo una aqoonsaneyso ilmahaaga. Wuxa inaga inoo sahlan inaynu rabno inaynu carruurteenna sabsabno oo aynu ku abaalmarinno macmacaan, cabbitaano iyo waqtidheeri ah oo shaashadda horteeda lagu qaato. Laakiin kaliya xasuusnow in tani ay si dhakhso ah oo aanad ka fikireynin ugu noqon karto caado taas oo u horseedi karta dabeecad saamayn caafimaad oo aan loo baahnayn leh.*

Waalid ahaan, waxaad adigu tahay qofka uu ilmahu ku dayanaayo, ilmahuna waxa uu qanjili/kaaga dayan doonaa caadooyinkaaga wanaagsan iyo kuwa aan yara wanaagsaneyn labadaba. Haddii aad leedahay caadooyin cuntada oo caafimaad leh oo aad xaddido waqtiga aad iska fadhido, ayuu ilmahaagu taas qanjili doonaa.


## CAADOOYINKA CUNITAANKA WAXYAALAHAA CAAFIMAADKA LEH

### WAQTIGA CUNTADA IYO WADA CUNTEYNTA

Carruurta iyo dadka waaweynba waxay u baahan yihiin inay si joogto ah wax ugu cunaan. Taasi macnaheedu waxa weeye quraac, qado, casho iyo 2-3 cunto fudud ah, oo ay ku jiraan maalmaha fasaxa ee dhamaadka todobaadka. Waxay fududeysaa in la cuno kaliya qadarka saxda ah, iyadoo ilkaha nasasho siisa inta u dhxeysa cuntooyinka.


### KHUDRADDHA MIRAH, MIRAH IYO KHUDRADDHA CAGAARAN

U soo dhig cunto midabo leh xilli kasta oo la cunteynaayo. Wuxa suurtgal ah in wax loo kala bedbedlo si aan xad laheyn. Wax kasta oo ay ka mid yihiin in lagu darro khudaarta cagaaran waxa la karinaayo ilaa u soo dhigida khayaar/qajaar ullo/qurubyo dhaadheer loo jeexjeexay, daba case/kaarooto, kaabash, iwm. Khudraddha miraha waxay noqon kartaa in siday tahay lagu cuni ama in laga dhigo khudaar goo'gona oo isku dhafan. Xusuusnow in carruur badani u baahan yihiin waqtidheeri ah si ay ula qabsadaan dhadhanka cusub iyo waxay ka kooban tahay. Laga bilaabo da'da afar jirka, ayaa waxa la soo jeedinaya laba xabbo oo khudraddha miraha ah iyo laba qeybood oo khudraddha cagaran ah maalintiiba. Wuxa ka wanaagsan in ilmaha loo soo dhigo iyadoo googo'an halka looga soo dhigi lahaa khudaar la shiiday. Cunista iyo calalista ayaa jimicsi wanaagsan u ah dhaqdhaqa muruqyada afka, taas oo muhiim u ah barashada luqadda ee ilmaha.



## ROOTI, BAASTO IYO DALAG ISKU DHAFAN

Waxa fiicantahay in la doorto rootiga iyo baastada waxyaalaha dalaga isku dhafan ka sameysan. Tani uma baana inay noqoto rooti dhamaan ka wada sameysan dalaga isku dhafan. Dalaga isku dhafan micnaheedu waxa weeye in dhammaan qeybaha kala duduwan ee dalagu uu ku jiro - frövita, frö iyo kli. Dalagu waxa laga yaabaa in dhammaan la wada jajabiyeey ama la ridqey. Boorashka miraha qabadinka ayaa 100% ka sameysan dalag isku dhafan.



## CABITAANO

Biyaha ayaa ah cabitaanka ugu fican marka uu ilmuuhu ooman yahay iyo sida cabitaan cuntada la socda. Caano ama cabitaanno miraha qabadin u eeg ku saleysan ayaa cabitaan cuntooyinka la socda loo isticmaali karaa, iyadoo dhowr koob oo maalintii ahi ay ku habboon tahay inay daboolaan baahiyaha kaalshiyamka ee ilmaha. Iska ilaallinta cabitaannada macaan sida cabitaanda khudaarta, cabitaannada soodhada leh iyo casiirka ayaa ilkaha ka dhiga qaar caafimaad qaba.



## KALIYA QEYBTA CUNTADA EE SAXDA AH

Qorshee oo cuntada u soo dhig sida ku saleysan 'habka saxanka cuntada' – waxoogaa khudaar ah, waxoogaa baradhada/bariis/baastada/sareen/hilibka/ waxoogaa qamadin ah iyo heed/kallunka/khudrad borotiin leh/hilibka. Tani waxay suggi doontaa inay wax wanaagsan oo nafaqooyin kala duduwan leh ka kooban tahay. Gacanta ilmaha ayaa kaa caawin karta inaad go'aamiso qadarka saxda ah.

## JIMICSI

Lugta, orodka, boodada, siqida, gurguurashada, fuulitaanka, isdheellitirka – dhammaan noocyada jimicsiga iyo dhaqdhaqaqyada ayaa muhiim u ah koritaanka/horumarka ilmaha, caafimaadkiisa iyo fayow qabkiisa/wanaagiisa. Ku dhiiri geli jimicsiga iyadoo la soo maraayo ciyaar iyo waxqabadka maalinlaha ah. Wakhtiga shaashada horteeda la fadhiyo xaddid. Xusuusnow – waalid ahaan, adiga ayaa ah qofka uu ilmahu ku dayanaayo

